

DUGSIGA SARE EE TOGDHEER

MAADDADA AFKA SOOMAALIGA

FASALAK 4AAD EE DUGSIGA SARE

CUTUBKA: 3AAD

HUMMAAGYADA/AF-MALDAHANEHA
SOOMAALIGA

BARE: MAXAMED NUKUR

AF-MALDAHANE/HUMMAAG

-Waa maxay hummaag ama af maldahane?

Af-maldahane waa : fududaynta, gudbinta fariimaha, sahlidda is-fahamka iyo kasbashada laabo kaa sii jeeda.

Af-maldahane waa: qalabka iidaama, koosaara, farshaxanimo iyo bilicna ku gaasheeya hadalka ama hawraarta.

Af-maldahane waa : qalabka kor u qaada xiise-gelinta hodantooyada hadalka ama hal-abuurka iyo heerka suugaanta uu soo bandhigayo.

Hummaaga/ Af-maldahu waa: tixda/tiraabta oo hu' la saaro, la hadoodilo, la sogordaho, la saamo-dedo ama la saynsaabo oo sida loo yidhi aanu macnihiisu ahayne uu yahay si ka duwan.

QAYBAHA HUMMAGYADA AMA AF-MALDAHANEYAASHA

1. Ekeeye
2. Qofayn
3. Sarbeeb
4. Duur-xul
5. Buun-buunin
6. Yamxeero
7. Quusin
8. Legaaddo
9. Shareere
10. Xus
11. Sillan-sugan
12. Astaamayn

1. EKEEYE

-Waa maxay ekeeye?

Ekeeyuhu waa : humaaga/ sawirka ama muuqaalka laga dhexaysiin karo laba shay oo kala duwan kaas oo ay wadaagayaan xidhiidh isu ekaanshona ay ku yeelanayaan labadaa shay ama walxood.

hadii labada hummaag ama sawir midkoodna aanu meesha ool waxaa shardi ah in midkood la isla garanayaa.

ekeeyuhu waxa uu leeyahay afar tiir oo lagu aqoonsado lagama maarmaanna u ah oo kala ah;
U EKE LOO EKE QALAB QAAB

TUSAALE

- badda midabkeedu waa sida cirka

U EKE = badda

LOO EKE= cirka

QALAB= sida

QAAB= midabkeedu waa

- habkan ekayntu, sida aynu korba ku soo xusnay waxa uuu leeyahay ereyo u qalab ah kuwaas oo ay ka mid yihiin (SIDA, GEDDII, GEDDEED, LA MOODO, U EG, LAGAA GARAN, CAYNKA, QAABKA, IWM.)

-Waxaa kale oo shardi ah habkan ekaynta marka la adeegsanayo, in ay jiraan laba shay oo xidhiidh laga dhexaysiinayo.

U FIIRSO TUSAALE YAASHAN HOOSE

B

- ✚ sida laan madheedhoo
- ✚ laagaha togdheer iyo
- ✚ ka lulmaysa hawdoo
- ✚ cirku laba sagaalaad
- ✚ ku lisaayey dhibicoo
- ✚ logobkiyo xareedii
- ✚ laac iyo man bixisaad
- ✚ laabta uga dhigan tahay

T

- ✚ lagumood barwaaqooy

✚ burco iyo nugaaloo
✚ intuu roob ballaysimay
✚ biyo dhigay xareedii

J

✚ Halka uu ka nuuxsado
✚ hadii nabar ka soo baxo
✚ naftu waw nuglaataa
✚ naxdintiyo jacaylkuna ✚
haday kugu negaadaan ✚
naafaad la noqotaa

X

✚ cosob raadi geeluba
✚ marbuu ciin ka daaqaa
✚ caal iyo nxadhaadhkee
✚ anna ciilka kama koro ✚
mana daayo caashaqa ✚
cabashona ma waayo

KH

✚ gu' hagaagay oo da'ay
✚ geyigoo barwaaqo ah
✚ guunyadu irmaan tahay
✚ gallad Eebbe keenaad
✚ nimcooy tahay geddeedii

2. QOFAYN

-Waa maxay qofayn?

Qofayntu waa: muuqaalka loo adeegsado marka lala hadlayo shay ama noole aan caqli lahayn, iyada oo loo jeedo ama lagula hadlayo dad ama qof.

Qofayntu waa : tixda/tiraabta la hadlaysa cid aan caqli lahayn balse ujeedadeedu ay ku socoto cid caqli leh.

TUSAALE

B.

✚ Daa'uusyow aroortii
✚ adaa doogsanaayoo
✚ deeqdii ilaahay
✚ adaa doonanaayee
✚ deeqa waxad tidhaahdaa
✚ inankii dayowyoo
✚ ma xasuusto dunidee
✚ mar uun soo calool debec

T.

✚ Dur-duryohow rogmanayaa
✚ nin waliba wuxuu diray
✚ ayuun buu dan moodee
✚ doon taan jeclaayoo
✚ ha dagaalin hayga didinin
✚ soo kexee dabadeeto

J.

✚ Gabbal dhaca cadceedyahay
✚ casar gaaban liiqii
✚ usii faano guratee
✚ godka weeraraysaa
✚ go'e fule miyaad atahay
✚ waa maxay garmaamadu

X.

✚ Adigaa gargooryahow

- ✚ webigii ganaaniyo
- ✚ gal durdura ku yaaloon
- ✚ abaaruhu ku gaadhine
- ✚ gabboodkii dhulkeenaba
- ✚ miyaad geed ku aragtaa
- ✚ sowkan gooyey jiilaal

3.SARBEEB

-Waa maxay sarbeebtu?

Saebeebtu waa: hadal ama hawraar aan si toos ah loogu soo bandhigin cidda loola jeedo. Waa muuqaal ujoodo fog leh oo aan si toos ah loogu abbaarin shayga loo jeedo, balse loo sii maro tibaax kale.

FG:

Sarbeebta waxa ay isku bah yihiin Duur-xulka, waxana lagu kala saaraa; macnaha ujeeddo ee Duur-xulku waa uu ka sii qoto dheeryahay maldahidda Sarbeebta faham ahaan iyo fasir ahaanba.

TUSSAALE

B.

- ✚ shalayba way cunaysaye waxay maanta uga shaacday
- ✚ ee ay bisadi jiir uga shakiday sheeg hadaad garato

T.

- ✚ saaxiib hadraawoow
- ✚ sakaraad ma lool baa
- ✚ far dhexaad ma suul baa
- ✚ seed adhi ma hilib baa
- ✚ jinow geel ma sixin baa
- ✚ nin la sigay ma nabad galay

J.

- ✚ Qof uu cudur dilaayo
- ✚ dawadaa bogsiisee
- ✚ haday dawo bukooto
- ✚ maxaa lagu dabiibaa

X.

- ✚ ma taqaan gobaadey
- ✚ geedka hadii uu baxo
- ✚ goonyaha u kala fido
- ✚ weligiiba gaamuro
- ✚ neef ka helin hadh uu galo
- ✚ ama midhiyo goobaar

4. DUUR-XUL

- Waa maxay duur xulku?

Duur-xulku waa: hadal ama hawraar duluc dahsoon leh, aadna uga fog weedha la isticmaalay iyo macnaha muuqda ee ay leedahay.

Duur-xulku waa: marka ereyga ama weedha laga soo raro macneha iyo ujeedada uu leeyahay, isaga oo si ku meel-gaadh ah loo siiyo macne ama weedho kale oo ka fog shayga loola jeedo.

Duur-xulku waa: sarbeeb xeel fog leh.

TUSAALE

B.

- ✚ Habeenooy hebedka geel
- ✚ hashaan maqasha iska celin
- ✚ harraatiyin ta aanay dhalin
- ✚ markay hiigaan nirguhu
- ✚ jiilaalkii bay hadhaa

T.

- ✚ wanaagsane walaalkay dhalyow wiilkayow maxamed

✚ sac wanaagsan oo wayl watoo kayd wahdiya jooga
✚ oo yarahe waal-waalanoo wiilasha eryooda
✚ weli inaanad naaskiisa qaban ii mar wacad ilaahay

J. ✚ adeer adigu way waanisaye waxaan ku waydiiyey
✚ hal waraabe dilay oo misana weli xalaaleeyey
✚ waax qalo hadii lagu yidhaa oon wax kugu raacin
✚ inaad an weel usoo qaadateen ii mar wacad ilaahay

X. ✚ nimay gacantu daabulo tiqiin beri haduu daayo oo
✚ uu yara dalleensado intii dac-san lloo yeelo damban
✚ maayo waagay xubnuhu yara dubaaxshaan

KH. ✚ Geenyada la fuulal xado iyo gabadh ta iimowda waxan
✚ ahay nin garab daar lehoo galow u sheegaaye maxaa
✚ gabadhu gabadhay dhashaay goday dhafoorkaaga

✚ inta geed ah geel-waaqis baa ugu guduud roone
✚ haddaanay gaajo xooluhu qabin goosan mahayaane
✚ halla kuuma galo roob-la-dhacu waase shay gob ahe
✚ galka sirow markii raacdadii laysku soo gaadhay
✚ neefyahow guduudani midkii gaabiyaad tahaye
✚ geegaaltanka waxa lahayd geenyadii hore'e

5. BUUN-BUUNIN

- Waa maxay buun buunin?

Buun-buunintu waa: muuqaalka ama sawirka la adeegsado marka hadalka ama hawraarta tiro iyo tayo ahaanba laga badinayo, kor loo dhaafinayo ama laga sarraaysiinayo sidii uu ahaa.

Buun-buunintu waa: muuqaalka badanaaba la adeegsado marka cid, shay ama noole la amaanyo.

TUSAALE

B. ✚ Caashaqaaga awgii
✚ cirkaa soo dumaye celi
✚ dhulku cararye soo qabo

T. ✚ haddii dunidaba dhamaan
✚ dumar isu qurux dhigtaa
✚ sidii dahab maar ku jira
✚ ama dab la shiday habeen
✚ ileen dayax baad tahee
✚ adaa lagu daawadaa

J. ✚ dhulka oo cagaaroo
✚ midho caar guduudiyo
✚ curdankii isugu jira
✚ badhna ay casaadeen
✚ dhirtu ay la ciirto
✚ cid ka gurata wayday

X. ✚ Aynigeeda dumarkiyo
✚ asaageed ka muaneey
✚ ilayskii cadceedaay
✚ afar iyo tobnaadeey
✚ olol iyo hillaaceey

6. YAMXEERO

- waa maxay yamxeeradu?

Yamxeeradu waa : ka dayrinta qof, shay ama xaalad, iyada oo lagu sheegayo si ka liidata ama ka hoosaysa sidii uu ahaa.

Yamxeeradu waxa ay koobsataa ama loo adeegsadaa xaalado badan oo nolosha ka mid ah sida: calaacalka, cabashada, diidmada, digashada, foorjada, IWM.

TUSAALE

B.

 Hadaad maanta doog iyo
 dahab shiilan u egtahay
 dayr iyo gu' dabadood
 daamankaa ku dheeraan
 da'ina waa ku haysaa
 haduu mawd ku daayo

T.

 hurdo miyaan dhakoolaa
 dhan markaan u seexdoba
 sow dhool la moodii
 dhabta anoo ku haysta
 dheelalow ma soo kaco

J.

 guntigiyo wadaadkii la eed geba-gebayntiye
 galow baa ka ciyey ceelashaad geesi ku ahayde
 garmaaddii shubaysiyo la waa garabyo wayntiye
 god abaadey waa kaa noqdiyo guri madoobaade

X.

 marka aan ladnaadoba
 sow haweenku ima luro
 lule iima qaataan
 laac iima dhigayaan
 oo ima lug gooyaan

KH.

 ha moodin adiguun
 in aan ku hiifee
 haween dhamaan baan
 ka hawl yaraystee

7. QUUSIN

-waa maxay quusintu?

quusintu waa : muuqaalka ama sawirka la adeegsado marka qof ama cid hadal ama hawraar loogu quusinayo iin, liidnimo, diciifnimo ama nusqaan uu leeyahay, iyada oo ereyga ama weedha lagu tilmaamay ay ujeeddadu ka ka duwan tahay kana hoosayso ama ka liidato.

TUSAALE

B.

 Intaan ubad kariirayoo kelyo buuran sidan lahaa
 ama buur intaan koro rayaha kaalay odhanlahaa
 keliday aan joogee orod oo kufkaa dayo

T.

 Kabo fay-gamuur ah iyo
 raggu laba go' iyo shaadh
 ayuu gaar u lahaa
 ma gashanid intoodii
 gadhna kaama soo bixin

J.

 Allaa faxane faroweey hadaan kugu filaan waayey
 nin fadeexad neceb ban ahay oo waan ku furayaa

8. LEGAADDU

-Waa maxay legaaddadu?

legaaddadu waa: muuqaal ama sawir lagu soo bandhigo ama lagu sheego laba erey ama weedhoo oo iska soo hor jeeda iskuna lid ah, macnehooda ujeeddona aanay dhici karin, suurto gal ahayn ama aan macquul ahayn.

Sillan-sugantu waxa ay Legaaddada kaga duwan tahay:

- Sillan-sugantu ujeeddo ahaan waa macquul ama suurto gal, halka Legaaddadu aanay macquul ahayn.

TUSAALE

B.

 Mugdi baan ka gacan haadiyaa maxamed kaydoowe
 maangado abaariyo dirri baan maax ka deyayaaye
 geel baan maqaarka u sidaa aan midi ka dhiiqayne
 dad uu musbaar dhegaha kaga jiraan maqal ka tuugaaye

T.

 Kurku awr uu waa hore go'aan ii kac leeyahay



J.

 Wahe dhalashadaadaan
 farxad waalan gaadhoo
 waayeel duceeyaan
 wacayoo u yeedhaye
 wan-qashaadii ma adaa
 cunay waaxyaheedii



X.

 lugta uun baan la jiidine sidii kaleba waa u liid



KH.

 Guduudane mar buu kugu noqdaa aar gabboodyo lehe
 gendi weheshigeed baa kaaga roon xuunsho gulux dheere
 gudcurkiyo caddadu waa midka aan gibilku saarrayne



9. SHAREERE

-waa maxay shareeradu?

Shareeradu waa: midaynta laba noole ama laba shay .

Shareeradu waa : heerka ugu sarreeya isu ekaysiinta.

FG: labada shay ama noole ee la isku shareerayo, sina loo kala duwi maayo, xidhiidhna laga dhexaysiin maayo balse si toos ah baa shayga looga dhigayaa shaygka kale.

TUSAALE

B.

 waa laan caleenloon
 ka hadh galo cadceedoo
 carfigiyo udgoonkana
 waa riix cawayskii
 iyo maali ciideed
 cadar la isku shubayee

T.

 Aduunyadan yihiinka ah
 qarniyadan u yaalka ah
 taariikhdan yul-yaladka ah
 dharaarahan yahoonka ah
 waxan shalayto yeelaan
 maantana la yaabaa

J.

 Ma cod dheera waa gabadh
 xishood baa u caado ah

-  cimri waa u gaban weli
-  caqli waa u waayeel
-  cidhib baanay leeahay

X.

-  Ubaxoo dillaacaay
-  habeen dedan hillaacey
-  waqalkii daruurtaay
-  haween taan ka doortaay

10. XUS

-Waa maxay xusku?

xusku waa : muuqaal ama sawir la adeegsado marka dhacdo ama sheeko waa hore jirtay lagu soo xidho ama loo soo qaato dhacdo kale oo hadda taagan.

sidoo kale xuska waxa la adeegsadaa marka qof dhintay ama aan markaa joogin la soo bandhigayo tibaaxdiisii ama astaamihii uu lahaa ama ku fiicnaa.

TUSAALE

B.

-  waraabaa ayaan yidhi
-  hadaad igu ogaydeen
-  baadida islaamkiyo
-  anoo aaran geel cuna
-  iimaan la'aantii
-  allaa iga hadeeyoo
-  istaaq-furula baan idhi

T.

-  galab aan adoogay
-  geed uu fadhiyi jiray
-  sheeko gaaban kaga guray
-  wuxu yidhi gu'yaal hore
-  boqor geesalaa jiray

J.

-  hawraar iyo sheeko
-  haween laga reebay
-  beraa habar guurtay
-  hayaan rereygeeda
-  waxay hilif saartay
-  markuu hollan waayey
-  waxay tidhi hoogey

X.

-  xalay gelin dhexaadkii
-  mar aan mayrac guuraha
-  sidii gooni daaqa cawl
-  gaaf meeray socodkii

11. SILLAN-SUGAN

-Waa maxay sillan-sugantu?

Sillan-sugantu waa: isa seegga ama iska hor imaadka laba erey, weedhood ama laba xaajo oo isku lid ah, isla markaana dhici kara ama macnehooda ujeeddo ay macquul tahay.

Sillan-sigantu waa: muuqaal ama sawir soo bandhigaya laba aragtiyood ama shay oo iska soo hor jeeda sida: BIDIX IYO MIDIG, QABOW IYO KULAYL, CUDUR IYO CAAFIMAAD IWM.

TUSAALE

B.

-  Cawa-daranta fiidkiyo
-  caddadaa walaalo ah
-  cadceedii timaadana
-  dadka ruux caddibanoo

 waayuhu ku ciiriyo
 mid caruusa baa jira

T.
 Cawooy maalin baa la yidhi
 cadooy gudcur baa la ydhi
 cidlooy wehel baa la yidhi

J.
 Dunidu waa caynba-caynoo
 waxaad ceebta u taqaan
 qof bay camalkiisa tahay

X.
 ninka dayaxa dhaafiyo ninkaan dhuunigaba haynin ninka
 dhura shidaalkiyo hubkiyo kaan dhitoba lahayn ninka
 dhalayga kadin soo godliyo dhaqayo kaan sheegan
 wacyigaa is dhaafshaye cabdow wax isma dhaameene

KH.
 Nimaan luggi jabnayn baan ahiyo, xoogga lawyadu e
 Hayeeshee laxaad kuma socdee, laangadhaan ahaye
 Madaxiyo laabtay fayow, oo xiskay ladane
 Waxse kuma lilloobaane, waan garasho liitaaye
 Loog kama qadoo dheefta, ways kaga ladaabtaaye
 Waxaanse luumanayaa majiro, amaan liqaayaaye

12. ASTAAMAYN(tibaax)

-Waa maxay astaamayntu?

Astaamayntu waa: muuqaal tibaaxeed loo adeegsado bixinta ama gudbinta feker ama aragti, balse aan si toos ah loo sheegin ama loo abbaarin weedha loo jeedo, haseyeeshee tilmaan ama sumad u gaar ah si dadban loo sheego odhaahda loo jeedo.

TUSAALE

B.
 Muudaaga xooluhu
 muuqiisa goortay
 meel dheer ka aragtay
 cagaheeda maashaa

T.
 hadii dhegta ruux la jaro
 daloolku wuu joogayaa
 jaleeladaa geed u yaroo
 midhaa laga jalamsadaa

J.
 waxaan saatir kuu qorin
 ha u suul-dhabaalayn
 inaad saamo jiiddiyo
 sanqadh-tirasho kala daa

X.
 Anoo jiiramaayaan
 inta aan janjeedhsado
 orod jagac ka siiyaa

KH.
 Taashkiyo garoomaha anoo laygu wada tiirshey
 ayuun baa la ii tumay durbaan taarna ii yimiye
 dabadeed tallaabo iyo arod taw ku soo idhiye
 tamuumkii waxan kusoo galay meel jinoon temedinayne

HUMMAAG-TUSAALEEDKA MANHAJKA

EKEEYE MANHAJKA

Dahabooy sidii madax guyoo muuqday baad tahaye
Marso curatay mood iyo hilaac midha baad tahaye
Sida mayeyga roob oo kalan kugu masaalaaye

Sida geel haraadoo wax badan hawdka miranaayey
Oo horo lasoo joojiyey oo kuraygu heegaayo
Oo hoobay loo qaaday iyo hadal walwaaleedka
Kolkaa hodan tidhaahdaanba waan soo hinqanayaaye

Sida tuunyadii hawd
Toddobkii ku hooroo
Gugiina uu ku taagsaday
Tiriig baxay lamoodyeey

Sida dhamastu geedaha
Dhirta uga saraysaad
Qalibiga uga dhigantee

Sidii cir kuhooray meel cosobloo
Cadceeddi u soo baxdaad tahay

Lagumood madix oo dhashiyo sidigti maadhine
Lagumood madheedh u egeey dahabki maarseeye

Magaalada Berbera maalintii madasha loo joogay
Lagumood hillaacii mudh yidhi ee muuqday labo jeere

Geed iyo ruux markaynu kala garano
Qoraxdoo geeskastaba falaadho gantay
Guduudka sagalkee u gaarka ah
Yaad geddeedii tahoo lagaa garan.

Daruur goor barqa ah ku guud timid
Intay biyo gelisay kala guratay
Yaad geddeedi tahoo lagaa garan.

Gelgelimo xareedahoo galacloo
Garaaryo leh baan lagaa garann

Sidi aad go'aygi tihiyo macawistaan goostay
Ama aad godki aakhiriyi geeri iga baajin
Gardariyaa maxaan Hodan Cabdaay kaaga go'i waayey?

Helmiyey oo hilmiyey,
oo ammaanti heli waayee
Hoosiisow midabkiisu,
ma habeenkiyo waagoo
kala haayirayaa

Lagumood dhirti maacaleesh midabadeediiye
Ma urraa, ma arraa, ma aleelo qubtaa?

SHAREERE MANHAJKA

Waa heerka ugu sarreeya isu eekeysiiinta laba hummaag Waa hadal ama tix lagu mideeyo labo humaag.
Tusaale

1. Cali waa birtii calanka
 2. Cabdi waa libaax
 3. Waa dhagax nafloo hayjadaa dhigay llaahaye
- Waa dhabarka seedaha ku yaal sidigta dhaameele
Dhadhaab adag haddii aannu ka bixin laguma dhaateene

4.Ayaan noolba tii qaylisaa waa iblays falane
Irdho qaado aashaana soco ayaar hadalkaaga
Is ogow afkaagana yasiro edebtu waa doore

5.Higlooy timahaagan hawdka ah
Wixii ku hallaaba lama helo
Naahooy gugoo hoorayeey galabta may raaci?

6.Geeluba ugaasooy markuu ayda miranaayo
Abeerkiisa naaxiyo markuu aaranku IS waayo
Isaguba ma kala aamusee waysu ololaaye
Haddaan ina'adeerooy ku idhi sow ma urugootid.

7.Afar labo lix goor buu sidaa iiga loogsadaye
Mar uun igama libaansanine way ladaabsadaye
Alla labiyo toban goor miyey liidnimo I raacday

Bal cirka tir bir ah ka eeg, dhulka tollin ku yaal
Rabiga talaada leh baa berri la hor tagaa

QOFAYN MANHAJKA

Waa hadal ama tix ay suugaanyahannadu ku cabbiraan dareenkooda iyaga oo waxa aan caqli lahayn sida dadka oo kale ula hadlaaya, waraysanaaya, fariin u dhiibaaya iwm.

Tusaale

1.Dugaag baa ku shiray meel
Daawana way lahaayeen
Hal dubaaxa buu helay
Waraabii dedaalee
Duqa weyn isaga buri
Darantii u wada dhigay
Waa ki dawrig!i Aar
Ku dallagay dhirbaaxada
Inuu dilase ma anayn
Wuxuu yidhi dayooy hee
Adna dib u qaroomee
Iskuwada darsay tidhi
Wuxu yidhi dayooy yaa
Daacadnimada kuu dhigay
Dacawadina waxay tidhi
Isha cali ninki deyey
Digniin wawgu filantahay!

Maxaan shimbiraha waraystay
Udhiibay waraaq daboolan
Haaddli wacdigaaga qaadday
Cid weeye tidhaahda weyday

Shimbir yahow dabaylaha
Daruuraha dhexmarayaa
Adigaa dunindoo idil
Keligaa u duulee
Warqaddan daboolanee
Dusha sawirku kaga yaal
Dawadii qalbiga
Degdeg iga gaadhsi.

Fiid meerta duushaay
Farin taydan qaadoo
Ha' fufurin adoon arag
Farxaddi jacaylkeen

Ku calool tayoobaa

Dabayl yahay Inaan ku dirtaan rabaa
Farrimahan daadah qaadoo
Ugee danabkaan jeclaa.

Waraabii arladan joogayow jiho lagaa roone
Jigjigaa lagaa naadiyood joogtay madaweyne

Fiinyahay adaa olalaya oo oohin ciirsadaye
Haddii aan lagu imanin waad aamusi lahayde
Maxaad aragtay waan kula qabaa uur ku taalada'e

Guuguulihiiyow haddaad guga u ooyeyso
Oo aad moodday keligaa inuu gubayo jiilaalku
Ama aad gabooyaha ku madhan gama ladiidayso
Gartaa maaha keligaa inaad gaar u cabataaye
Guumays cirroobaan ahaye war aan ku gaadhsiiyo

BUUN-BUUNIN MANHAJKA

Waa hadal ama tix tiro ahaan iyo tayo ahaanba muujinaaya wax SIdii uu ahaa si ka badan loo sheegay. Waa hadal wax lagu ammaanay, amma tookh iyo gooddi isugu Jira. Waa tix ama hadal tilmaamaaya sida: Muuqaalka, quruxda, qiimaha, kartida iyo dheefta uu shay waliba leeyahay Si ka heer saraysa in loo soo bandhigay.

Tusaale:

1.Markay maqan tahay magaalda dhammi
Mugdi weeyoo way madowdee.

2.Aamina siraadeey haween waad u sidaaaye
Sifahaaga nimankii arkay iyo sida lagu uumay
Ma sahlana warkay keenayeen sud iyo geel woobe
Saraar-goddana waalagahayaa suuradaad tahaye.

3.Diric nagama madhan meesha iyo duudki Nebigiilye
Inuu nagu daruurnaa halkiyo Cali Abii-Daalib
Dadku haatan waa wada og yahay dunida j00gaaye

4.Xaggii loo dayaba waa gammaan xulashadiisiye
Goortaan xusuus u la noqdaa xiise ii qabane
Xubno toosanow neefku waa xaalad gooniyahe
Waxaan xarafka dimeed ahayn igaga xeel dheere.

5.Baxsanow Hadraawow
boqorkii ammaantow
Baashihii aqoontoow

6. Adduunyada qof la qurux ahi ma joogo

DUURXUL MANHAJ

Gacalkeed hawaydee hadday geenyo kaa hebedo
Uu haayir nooliba yarqaan heeradkay mirato
Heensaha inaad kala baxdaa saw hal gar ah maaha

Gammaan kiina badan faytinow gobalba waa cayne
Qaarbaan ka gooriyo ka goor godalka daynaye
Qaar baan garmaamada la barin gaalibna aqoone
Gabax lagu shakaalyow sengihi gaabi oradkiye
Gacalnimo haddaa naga rabtaan go'aha noo doorsha
Haddii kale sidaa noo gasheen yaa inoo godob ah

Anigoo dhex jooguu calfaday dhidarkii hoobaane
Webiganuu dhankaa kala maray iyo dhirahan waaweyne
Afarteeda dhaadheer inuu dhuuxay waan hubaaye
Xalay dhimatay geelaba hashii ugu dheg roonayde

Geenyada nin lihi qootashee qolqolka daaqaysa
Qiyaas li'i ninkii ugu tagow qoomamaa xigiye

Qumbe malab ah oo meel qotoma oo nin lihi quulo
Qooraansigisaa u daran quud aan la cunayne

Hasha jilicsan iyo qaalmahaad wada jalleecayso
Mid ku joogso layskuma darsado labo jidhaamoode

Laftisoon adkaan wiil hadduu rag isku loohlooho
Laqantooyo waa eedi jiray loofar baaluqaye

Wanaagsane walaalkay dhalyow willkayow Maxamed
Sac wanaagsanoo weyl watoo kayn wahdiya jooga
Oo yarahe waalwaalanoo wiilasha erylada
Inaanad weli naaskiisa qaban i mar wacad Eebbe

SARBEEB MANHAJKA

Waa hadal ama tix sida qaalibka ah u badan hal-xidhaalaha, googalysiga iwm.
Waa hadal ay isku bah yihiin duurxulka haseyeeshee ka ujeeddo dhaw.

Tusaale

1. Nimanyahow ciraab laguma kaco curuf la'aaneed e
Cod xidhaal ah oo wada cajib ah cayn aan ka higaadsho
Wax cad oo madow baan arkee Cara e yaa sheega?

Waxa dunida caaqil u ah oon ciddi khilaafaynin
Oo caasiga iyo caabudkuba wada cisaynaayo
Aan calalna oogada ka qabin carae yaa sheega?

Wax calaha ka dheer baa jirOon ciddi ka gaabnayne
Cidhib dhiibsi kuma gaadhi karo cududaheenaase
Caynkaasna anigaa arkee cara e yaa sheega?

Cawadii waxaan kaa tagayn cadowna kaa eegin
Oo waaga kaa caraaya oo kugu cid laynaaya
Caynkaasna anigaa arkee cara e yaa sheega?

Wax caantaynka iyo ka fudud caaradiyo baalka
Culaysna loogu go ay oo natluhu caajis ka ahaaday
Caynkaasna anigaa arkee cara ee yaa sheega?

Jawaabti hal-xidhaalaha:

Shantaa qodob ee sare ku xusan, jawaabihii abwaan Gooni ka bixiyey waxa ay ahaayeen sidan:

Annagaan ciraab Iri ku kicin curuf la'aaneede
Cod Xidhaal an oo wada cajib ah cayn aan ka higaadsho
Wax cad oo madow sow indhaha ina carroow ma aha

Waxa dunida caadil u ah oon ciddi khilaafaynin
Oo caasiga iyo caabudkuba wada cisaynaayo
Aan calalna oogada ka qabin waa cajib llaahe
Cunno weeye oo waa aqaan caynka ay tahaye
Caradhoonku waa waxaad kurtin calalinaysaane
Maxaad iga cimrayn anigaa kaa ciraab badane

Wax calaha ka dheer baa jiroon ciddi ka gaabnayne
Cidhib dhiibsi kuma gaadhi karo cududaheenaase
Caqli nin aan lahayn naatan waa la cajabaayaaye
Ma adaan carraabada gudmada ceelasha u qadin
Cawadii waxaan Kaa tagayn cadowna Kaa eegin
Oo Waaga Kaa caraaya oo ku cid la aynaaya
Caqli nin aan lahayn haatan waa la cajabaayaaye
Cudaarkiyo xidkana kale miyuu calagu noo Sheegi

wax caanataynka iyo ka fudud caaradiyo baalka
Culaysna loogu go'ay oo naflunu caajis ka ahaaday
Caqli nimaan lahayn haatan waa la cajabaayaaye
Camcamada nafta iyo waa denbiga laysku caajimaye
Nin cadaab ka baqayaa ma falo camalka qaarkiise
Cawdiyo-billee Eebbe maa laga cabsoonaado.

Tiro-siman sagaal tuur
Soddon keen sideed hoo
Waxa hadhay bal Suureer

Hadhkaygaa hadhkiisa hoos maray
Oo biyaan isku hoos harraatinay
Shifo wax aan lahayn oo la cuno sheeg haddaad garato

XUS MANHAJKA

Xusku waa hadal ama tix ay hal-abuuradu ku xusaan taariikh run ah oo dhacday sida taariikh nololeedkii hebel iwm. Waxa kale oo uu Xusku noqdaa suugaanta ay abwaannadu ku xusaan sheeko xarirooyinka. (beri waxa jiri jirey iwm)

Tusaale:

1.Haw dhuran dhunwaagii Laftuu dhuuxay eersadaye

Qab qab dhaafay bay labo qabil qaran ku weydaaye
Qaabilba Haabil kolkuu qoonsaduu dilaye

Geeiyeey Xishood laay
Xejaay fogeeyaay
Xaashe'e aftahanimu
Xeeldheereheedii
Haddi uu xabaal galay
Abwaankii xiddigin jirey
Haddii aan bud-dhigay xalay
Murtidi xag loo dayo
Xulashada ahaydiyo
Xarragada higaaddii
Ayaa xarafkii hoos dhebi?

Belef waxaan ku haystaa
Beri inuu waraabuhu
Dameeraha ka baqan jirey
Bal dhadhami dhegtaydaa
Bixisaa ka keentoo
Weli waa ka baacsada!

Abidkii rag waa go i jiree kanise waa gawe
Lix hal oo u wada gaar ahaa gacanayaa mooyi

Geesi naga baxoo guul dhashuu ahaa

Axmed-gurey ma uu dhiman,
ma goblamin darwiishkii,
geenyadu ma daalana

Allow yaa darwiishki farrin debeccan gaadhsilya

YAMXEERO (DAYRO) MANHAJKA

Waa hadal ama tix dhaliil ama dhiillo ah. Waa tix ama hadal u badan calaacalka.
Mararka qaarna waa hawraar qof lagaga dayrinaayo ama xaalad nololeed, bulsho iwm.

Tusaale

1.Gool weyn midi loo qalay ee gogosha loo dhoobay
Weelkeedu tuu gorof yahay een laguba gaadhaynin
Min guraar ninki loo dhigay gobi la'yaabtaaye
Intaan cil la'gaw odhan lahaa guur'aan ka la aado

2.Surinki aan joogaba dhulkaan samay ka jeexaaye

Salaadaha suniyo waajibkii waan sahwiyaaye
Subciskii Quraankiyo digriga seegay waayahane

3.Ma tallaabadaan la qadhqadho0 tiigsi lugo mooday

4.Daab gudimo weli sooma goyn wilashaan diraye
Afarti cagaha googo naa ayaa caawa i hadhaye

5.Tiiraanyo cuduriyo
Nimay tawsi haysaa
illeen taah madaayee

6.Kuwii aniga ii dhaxay miyaa dhimashaday doonay
Raggaaan dhalay ragguu dhalay miyaa dhamamax ii diiday

Midda gaaban ee garabka iyo guudku wada joogo
Ee socodka uma gaatiso ee giriiflaynaysa
Ee guro ma laacdo ah ee ratiga juu ku ganac goysa
Jambal gihin ah oon golos lahayn guur aan ka la aado

Waa dhaawac kugu yaal bahdii dhaqasho diiddaa

Allahayow afkaygiyo sideen aadmiga u eeday

Qorraxdii dhacdaba teenu way kala qaxaysaa

LAGAADO (QUUSIN) MANHAJKA

Waa hadal ama tix macnihiisu yahay lidkiisa. Waa tix ama hadal tusaale ahaan laga Istaagey dhanka wanaagga iyada oo macnaha saxda ah ee loola jeedaana ay tahay dhanka xumaanta Waxa loo adeegsadaa qof loo qarinaayo dhinaca uu ka liito , waxaana loogu quusiyaahab kaftan ah si aannu dareen qaadasho dhab ah u yeelan, waa hab ku digasho ah oo aan haddana qofka si dareen taabad leh hadalka loogu odhaynaynin.

Tusaale

1. Faadumo hillaac (gabadh madow)
2. Jaamac dayax (nin madow)
3. Cabdi qurux . (nin foolxun)

4.Daaduunka uu maxamed qabo waan ku diirsadaye
Waa lagu digtaa ruux haduu kuu darraan jiraye
Bal dayaay wadaadkii wakaa sii dabayshaydaye

Higlo weeye dulin badan
Waana hogo kalileed

Hongoraha cadceeduu
Ka hadhgalay qadhaabkii
Haylaa ka yara kacay
Hurdana wuu iskaga jirey
Hilaac wax I tusbay tidhi
Kuye heeliyooy toos
ga eeg kor iyo hoos
Miyaan hoolif mooyee
Hal turxaana leeyahay
Wax ka sheega haaruun
Halacsiga sarbeebta ah
lyadoon ku hawshoon
Haka yaabin bay tidhi
Huuhaadu digashiyo
Hab sabaale weeyaan
Waana lays hundo og yahay.

SILLAN-SUGAN MANHAJKA

Waa hadal ama tix ka kooban erayo ama weedho iska soo horjeeda ama isku lid ah. Macne ahaanna waa hadal isburinaaya.

Tusaale:

1.Haddaad dhimato geeridu marbay nolosha dhaantaaye
Dhaqashiyo mar bay kaa yihiin dheregu xaaraane
Dheddigaansho waa ceeb inaad dhemaadsataa meele

2.Dhulka waan SOcdaa
Waanan dhaafsanee
Ciku wuu dhowyahey
Waanu dheeryahee

3.Dacartuba marbay malab dhashaa 0omuudsataa dhabaqe
Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh meel ku wada yaale

4.Midigta iyo bidixdaydu waa laba mataanoode
Midi waa martida soora iyo maati daadihise
Midina waa mindiyo xiiraya iyo muriya deebaaqe
5.Albaabbada dushaasaan ka jirey aqalna waan jitey
Aradkana dad kuma weheshanayn uruma waan Joogey

6.Ufo dhibicdu may wadan haddana ooduhuu ulayey
Awaarii ma nabin oo haddana WUU anracay Keynta

7.Ma maqanahay ma joogaa
Ma mir kacay ma negi yahay

8.Oon baa dilay oo biyaan ku agwareegaayey
9.Dhamac yaan lagaa shidi addoon dhimmana noolayne

ASTAAN MANHAJKA

Astaantu waa hadal ama tix ku saabsan xornimadii ama gobonimadii soomaaliyeed. Astaantii Xornimaduna waxa ay ahayd hal loogu magacdaray Maan-deeq.

Tusaale:

1.Galool iyo Maraa iyo hashaan kidiga gaylaanshay
Gaajiyo harraad badan hashaan ugu garaacaayey
Goortii sidkeedii go'ay ay galabti fool-qaaday
Iyadoo candhada gijisay 0o godol ku sii deysey
Garaad nimaan lahayn bay la tahay waad ka gaagixine

2.Dambarkeeda maandeeq kolkii weelka lagu duugey
Durdur iyo rakaad caanihil duul yar baa dhamaye
Dibjirki u soo diriray iyo doobki la illawye

3.Maantay curatoo mataano dhashee
Magowdoo candhadii golaha marisee
Aan maallo hasheena Maandeeq.

4.Awrkii gulaaniyo hashaan gubadlaha u didey
Wax la yidhi gal daanyeer caDday nabari gaysaaye.
b.Maandeeq markay curtaybay laba mas raaceen

T.Adduunyo hal baan lahaa,
hashii horrorbayga cunay,
hadhuub madhan baan sitaa

Haayaay bal eega,
hasheenan naaxday,
libaaxu haysto,
dhiigga ka haw leh.